

Ku socota adigaaga carruur ugu jirto Norrköping dugsiyadeeda xanaanada iyo hoyga xilli firaqaha ee deqmadu leedahay

2020-11-30

Miyaad fursad u haysataa inaad ilmahaaga ku hayso guriga inta lagu jiro fasaxyada Kirismiska iyo sannadka cusub?

Waan idin salaamay!

Intii lagu jiray xilliga deyrta waxaa qaar badan oo ah dugsiyadayada xanaanada iyo iskoolada raad ku yeelatay xaaladda cudurka aduunka ku faafay oo waxaa badnayd shaqaalaha ku maqnaanshahooda jirro. Shaqaalaha caafimaad qabay ee joogay goobta waxay ku dadaaleen inay xaliyaan xaaladda oo waxay xooga uga shaqeeyeen inay sii wadaan waxbarasho fiican si carruurta u horumaraan oo u bartaan waxyaabo cusub. Shaqaaluhu dib ayay isu habeeyeen oo isku taageereen. Qaar badan oo ka mid ah shaqaalaha way daalanyihiin oo waxay u baahanyihiin inay nastaaan. Si inta ugu badan ee suurtagal ah ee shaqaalahayaga ah ay u helaan fasax ay u qalmaan waxaanu ka codsanaynaa adigaaga shaqaynaya fasaxyada Kirismiska, haddii ay suurtagal tahay in ilmahaagu joogo guriga xilliga fasaxa Kirismiska.

Waanu fahamsanahay inay tani adkaan karto, oo haddii fursadani aanay jirin waxaa dabcan ilmahaaga lagu soo dhawaynaynaa dugsiya xanaanada ama hoyga xilli firaqaha. Laakiin haddii aad tusaale ahaan fursad u haysato inaad shaqayso adigoo jooga gurigaaga inta lagu jiro ayaamaha qaarkood ama daryeelka u xalin kartid si kale, markaas waxaanu kaa codsanaynaa inaad ilmahaaga ku hayso guriga. Way na caawinaysaa marka qaar badan oo ka mid ah shaqaalahayaga dhinaca dugsiya xanaanada iyo hoyga xilli firaqaha ay fursad u helaan inay nastaaan. Inagu ma garanayno inta uu cudurkan aduunka ku faafay sii socon doono. Waxaanu daneynaynaa shaqaalahayaga oo waxaanu doonaynaa inay u adkaystaan oo ku filnaadaan oo abuuraa xaaladaha ugu fiican ee loogu talagalay carruurta oo dhan xitaa marka uu jiro cudur faafay oo dad badan xanuusanayaan. Waxaanu si diiran idiinku mahadnaqaynaa in haddii aad fursad u haysato aad na caawiso oo arrintaa ku taageerto shaqaalahayaga.

Haddii aad fursad u hayso inaad soo gaabiso wakhtiyadaada xilliga fasaxyada Kirismiska iyo sanadka cusub waxaad wakhtiyadaas isbaddalay u sheegi kartaa dugsiya xanaanada iyo hoyga xilli firaqaha.

Dhinaca norrkoping.se waxaa ku jira macluumaad ku saabsan koroona faayraska kuna jiheysan waalidka. Halkan waxaad tusaale ahaan ka akhrin kartaa waxa ansaxa ah dhinaca khidmadaha daryeelka carruurta.

www.norrkoping.se/information-om-det-nya-coronaviruset/har-du-barn-i-norrkopings-forskola-skola.html

Si weyn ayaad ugu mahadsantahay fahamkaaga iyo caawimaadaada!

Salaan diiran

Xafiiska waxbarashada